

SOO BANDHIGIDA DIIWAAN GELINTA TOOSKA AH

XOG LOOGU TALAGALAY WAALIDIINTA IYO MASUULIYIINTA

WAXA AY TAHAY INAAD FILATO

Barnaamijka Diiwaangelinta Tooska ayaa diyaar u ah inuu siiyo cunugaaga fursad uu ku kala doorto jaamacadaha iyo kuleejyada uu heli karo ee dugsiga sare kadib ku sugaaya. Dayrtaan, waxaa lagu soo wargelin doonaa ardaygaaga dugsiga dhamaynaaya tiro badan oo kuleejyada iyo jaamacadaha ku yaala Minnesota kuwaasoo siinaaya Diiwaan gelinta Tooska ah si uu u dhigto xaruntooda dayrta 2024.



AKHRI WARAAQDAADA

Waxaan kugu dhiiri gelinaynaa inaad la akhrido cunugaaga waraaqdiisa gaarka ah ee Diiwaan Gelinta Tooska ah ee xiliga dayrta 2023. Waxaa ku qornaan doona liiska dhammaan kuleejyada iyo jaamacadaha siinaaya Diiwaan gelinta Tooska ah.



DOORO KULEEJKAAGA

Waraaqada oonlaynka ah, wuxuu ka dooranayaa kuleejyada iyo jaamacadaha uu doonaayo inuu ka helo Diiwaan gelin Toos ah. Dib ugu celi waraaqda dugsiga sare, kadibna buuxi codsiga ku jira barta oonlaynka ah.



TALLAABOYIN- KAAGA XIGGA

Ayadoo ku xiran kuleejyada iyo jaamacadaha la doortay, ardayda ayaa heli doona waraaqahooda rasmiga ah ee aqbalaada! Xarumaha qaar ayaa codsan doona xog dheeraad ah kuuna soo diri doona iimeelka talaabooyinka xiga.



TAAGEERISTA RIYOYINKAAGA KULEEJKA

Marka aad adeegsato Diiwaan gelinta Tooska ah, ardayda dugsiga sare dhamaynaaya ee Minnesota ayaa heli doona wargelinta hordhaca ah ee kuleejyada iyo jaamacadaha ku jira barnaamijka ee ay ka heleen aqbalaada - xataa kahor inta aysan codsan!